56. Kan (Nabiga iyo Quraankuba) waa dige ka mid ah u digayaashii hore.

هَٰذَا نَذِيرٌ مِّنَ ٱلنُّذُرِ ٱلْأُولَىٰٓ ﴿٥٦﴾

57. Wayna dhawaatay Saacaddi Qiyaame.

أَزِفَتِ ٱلْـَٔازِفَةُ ﴿٥٧﴾

58. Wax Eebe ka soo hadhay oo ogna ma jiro (markay dhici).

لَيْسَ لَهَا مِن دُونِ ٱللَّهِ كَاشِفَةٌ ﴿٥٨﴾

59. Ma quraankanaad la yaabantihiin.

أَفَمِنْ هَٰذَا ٱلْحَدِيثِ تَعْجَبُونَ ﴿٥٩﴾

60. Ood qoslaysaan (idinkoo beenin) oydaanna ooyeynin (cabsi darteed).

وَتَضْحَكُونَ وَلَا تَبْكُونَ ﴿٦٠﴾

61. Idinkoo waliba hilmaansan (islana wayn).

وَأَنتُمْ سَٰمِدُونَ ﴿٦١﴾

62. Ee dadow Eebe u sujuuda caabudana.

فَٱسْجُدُوا۟ لِلَّهِ وَٱعْبُدُوا۟ ۩ ﴿٦٢﴾

Eebe awooddiisa yaa wax walba ku jiraa, hadduu doonana wuu halaagaa Cidduu doono sida kuwaas Quraanku in badan ka warramay oo kale, maxaayeelay way kibreen'Nicmada Eebana way beeniyeen iyo xaqaba, saas daraadeed waa in Eebe laga yaabo, Qiyaamadana loo darbado, Quraankana la rumeeyo, kibir, isla wayni iyo qosol xaq ku beeninna la iska jiro, Sujuudda Eebe iyo cibaadadiisana la badiyaa, iyo xumaantaada oo laga ooyaa. Ibni Cabbaas wuxuu yidhi: waxaa Sujuuday Nabiga (naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) (markuu akhriyay) «An-Najm» waxaana la sujuuday Muslimiintii, Mushrikiintii, Jinni iyo insiba.
waxaa wariyay Bukhaari. An-Najm (50-62).

## Suurat Al-Qamar

## سُورَةُ القَمَرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa Ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa dhawaatay Saacaddii (Qiyaame), dayixiina wuu dillaacay.

ٱقْتَرَبَتِ ٱلسَّاعَةُ وَٱنشَقَّ ٱلْقَمَرُ ﴿١﴾

2. Hadday Gaaladu arkaan Aayad way ka jeedsadaan waxayna dhahaan waa Sixir daran.

وَإِن يَرَوْا۟ ءَايَةً يُعْرِضُوا۟ وَيَقُولُوا۟ سِحْرٌ مُّسْتَمِرٌّ ﴿٢﴾

3. Way beeniyeen (Nabiga iyo xaqa) waxayna raaceen Hawadooda, amar kastana wuxuu leeyahay meel uu ku sugnaado.

وَكَذَّبُوا وَاتَّبَعُوا أَهْوَاءَهُمْ وَكُلُّ أَمْرٍ مُسْتَقِرٌّ ﴿٣﴾

4. Waxaana ugu yimid dhab ahaan warar ku dheehan waano.

وَلَقَدْ جَاءَهُمْ مِنَ الْأَنْبَاءِ مَا فِيهِ مُزْدَجَرٌ ﴿٤﴾

5. Waana Xigmad xeel dheer, maxaysa tari udigidi.

حِكْمَةٌ بَالِغَةٌ فَمَا تُغْنِ النُّذُرُ ﴿٥﴾

6. Ee iskaga jeedso (sugna) Maalinta mid dhawaaqaa uu ugu yeedhi wax daran.

فَتَوَلَّ عَنْهُمْ يَوْمَ يَدْعُ الدَّاعِ إِلَىٰ شَيْءٍ نُكُرٍ ﴿٦﴾

7. Aragooduna wuu dullaysnaan, waxayna ka soo bixi Qubuurahooda iyagood moodid Ayax faafay.

خُشَّعًا أَبْصَارُهُمْ يَخْرُجُونَ مِنَ الْأَجْدَاثِ كَأَنَّهُمْ جَرَادٌ مُنْتَشِرٌ ﴿٧﴾

8. Iyagoo u dagdagi dhawaaqaha xaggiisa, waxayna dhihi Gaaladu kani waa Maalin daran.

مُهْطِعِينَ إِلَى الدَّاعِ يَقُولُ الْكَافِرُونَ هَٰذَا يَوْمٌ عَسِرٌ ﴿٨﴾

Calaamooyinka Qiyaamada waxaa ka mid ah soo bixintii (Nabiga) (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee).
Gaaladuna wax kastoo ku tusin xaqnimada (Nabiga) «oy arkaanba way beeninayeen, iyagoo sixir iyo xumaanba ku sheegi, wax walbase meel uu ku dhammaaduu leeyahay, waase in la waana qaato lana raaco xigmada Quraanku sheegi inta ka horraysa Qiyaamada iyo abaal-marinta loona darbado Maalintaas wayn.
Waxaa laga wariyay Khaalid binu Cumayr inuu yidhi: waxaa khudbad noo akhriyay Rasuulkii Eebe Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee» Eebuuna ku mahadiyay kor ahaaye'wuuna ammaanay waxuuna yidhi (intaa ka dib Adduunyadii waxay ogaysiisay goyn'wayna jeedsatay, kamana hadhin wax yar oo la mid ah weel wax ku hadhay oo Ruuxu qaadanayo, waadna ka guuraysaan xaggeeda una guuraysaan Daar aan tagaynin, ee ka guura idinkoo wata camalkiinna khayrka badan, waxaa naloo sheegay in dhagax lagu tuuray salka Jahannamo uuna sii socon Toddobaatan Sano isagoon salka gaadhin, Wallahi in la buuxin'Ma la yaabteen? Wallaahi waxaa naloo sheegay in Jannada labadeeda Albaab loo socdo Afartan Sano, waxaana iman Maalin ay cidhiidhi la buuxdo. Waxaa wariyay Imaam Axmad Binu Xambal. Al-Qamar (1-8).

---

9. Waxaa beeniyay (xaqa) iyaga hortood (Nabi) Nuux Qoomkiisii, waxay beeniyeen Addonkanagii, waxayna dheheen wuu waalanyahay،waana la guulguulay, «oo la canaantay».

۞ كَذَّبَتْ قَبْلَهُمْ قَوْمُ نُوحٍ فَكَذَّبُوا عَبْدَنَا وَقَالُوا مَجْنُونٌ وَازْدُجِرَ ﴿٩﴾

10. Eebuuna tuugay inuu tabaryaryahay oo u gargaaro.

فَدَعَا رَبَّهُ أَنِّي مَغْلُوبٌ فَانْتَصِرْ ﴿١٠﴾

11. Markaasaan ku furay Albaabbada Samada (Cirka) Biyo badanna ka keenay.

فَفَتَحْنَا أَبْوَابَ السَّمَاءِ بِمَاءٍ مُنْهَمِرٍ ﴿١١﴾

12. Dhulkana Eebaa ka dillaaciyay ilo, wayna kulmeen biyihii amar la qadaray dartiis.

وَفَجَّرْنَا ٱلْأَرْضَ عُيُونًا فَٱلْتَقَى ٱلْمَآءُ عَلَىٰٓ أَمْرٍ
قَدْ قُدِرَ ﴿١٢﴾

13. Waxaanna ku xambaaray Nabi Nuux (Doon) Looxyo iyo Musbaarro leh.

وَحَمَلْنَٰهُ عَلَىٰ ذَاتِ أَلْوَٰحٍ وَدُسُرٍ ﴿١٣﴾

14. Kuna socota ilaalintanada si loo abaalmariyo cidda Gaalowday.

تَجْرِى بِأَعْيُنِنَا جَزَآءً لِّمَن كَانَ كُفِرَ ﴿١٤﴾

15. Waxaan uga tagnay (yuu Eebe yidhi) Calaamad (lagu waantoobo) ee ma jirtaa cid wacdoomi (oo wax xusuusan).

وَلَقَد تَّرَكْنَٰهَآ ءَايَةً فَهَلْ مِن مُّدَّكِرٍ ﴿١٥﴾

16. Seese yahay Caddib Eebe iyo digiddiisu.

فَكَيْفَ كَانَ عَذَابِى وَنُذُرِ ﴿١٦﴾

17. Waan fududaynnay Quraanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid wacdoomi.

وَلَقَدْ يَسَّرْنَا ٱلْقُرْءَانَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِن مُّدَّكِرٍ ﴿١٧﴾

**Qisada (Nabi) Nuux iyo qoomkiisii wax badanbuu Quraanku sheegay, si loogu waana qaato'falkoodii xumaana looga leexdo, samaantana la falo, Quraanka Eebe fududeeyayna la raaco'laguna dhaqmo wanaaguu u yeedhi. Ibnu-Cabbaas wuxuu yidhi: Haddaan Eebe u sahlin Quraanka Carrabka Aadamiga Ruux khalqiga ka mid ah ma kareen inuu ku hadlo kalaamka Eebe. Al-Qamar (9-17).**

---

18. Caadna way beenisay (xaqii), seese noqotay caddibaaddii Eebe iyo u digiddiisii.

كَذَّبَتْ عَادٌ فَكَيْفَ كَانَ عَذَابِى وَنُذُرِ ﴿١٨﴾

19. Waxaan ku dirray korkooda dabayl qabaw daran Maalin baasaysan dhexdeed oo Joogta ah.

إِنَّآ أَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ رِيحًا صَرْصَرًا فِى يَوْمِ نَحْسٍ مُّسْتَمِرٍّ ﴿١٩﴾

20. Oo dadka siibaysa sida Timir gunteedii la rujiyay.

تَنزِعُ ٱلنَّاسَ كَأَنَّهُمْ أَعْجَازُ نَخْلٍ مُّنقَعِرٍ ﴿٢٠﴾

21. Seese ahaa caddibaaddii Eebe iyo u digiddiisii.

فَكَيْفَ كَانَ عَذَابِى وَنُذُرِ ﴿٢١﴾

22. Waxaan ufududaynay Quraanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid ku wacdoomi.

وَلَقَدْ يَسَّرْنَا ٱلْقُرْءَانَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِن مُّدَّكِرٍ ﴿٢٢﴾

23. Waxaa beenisay (xaqii) loogu digay Thamuud.

كَذَّبَتْ ثَمُودُ بِٱلنُّذُرِ ﴿٢٣﴾

24. Waxayna dheheen ma Ruux dad ah oo naga mid ah yaan raacaynaa, markaas waxaan ku sugannahay baadi iyo dhibaato.

فَقَالُوٓا۟ أَبَشَرًا مِّنَّا وَٰحِدًا نَّتَّبِعُهُۥٓ إِنَّآ إِذًا لَّفِى
ضَلَٰلٍ وَسُعُرٍ ﴿٢٤﴾

25. Ma isagoo na dhexjoogaa waxyi lagu soo dajiyay, saas ma aha ee waa beenbadane kibirlow ah.

أَءُلْقِيَ ٱلذِّكْرُ عَلَيْهِ مِنۢ بَيْنِنَا بَلْ هُوَ كَذَّابٌ أَشِرٌ ﴿٢٥﴾

26. Way ogaan doonaan barri cidda beenbadane kibirlow ah.

سَيَعْلَمُونَ غَدًا مَّنِ ٱلْكَذَّابُ ٱلْأَشِرُ ﴿٢٦﴾

27. Hashii Annagaa soo bixinnay Jirrabkooda dartiis, Ee sug kuna samir.

إِنَّا مُرْسِلُوا۟ ٱلنَّاقَةِ فِتْنَةً لَّهُمْ فَٱرْتَقِبْهُمْ وَٱصْطَبِرْ ﴿٢٧﴾

28. Una warran in biyuhu yihiin qayb (iyaga iyo Hasha), cidbana maalin gaara leedahay.

وَنَبِّئْهُمْ أَنَّ ٱلْمَآءَ قِسْمَةٌۢ بَيْنَهُمْ ۖ كُلُّ شِرْبٍ مُّحْتَضَرٌ ﴿٢٨﴾

29. Waxay u dhawaaqeeen saaxiibkood hashiina wuu dilay.

فَنَادَوْا۟ صَاحِبَهُمْ فَتَعَاطَىٰ فَعَقَرَ ﴿٢٩﴾

30. Seese ahaa caddibaaddii Eebe iyo u digiddiisii.

فَكَيْفَ كَانَ عَذَابِى وَنُذُرِ ﴿٣٠﴾

31. Dhawaaq kaliyaan ku siidaynay, waxayna la mid noqdeen jabad burburay.

إِنَّآ أَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ صَيْحَةً وَٰحِدَةً فَكَانُوا۟ كَهَشِيمِ ٱلْمُحْتَظِرِ ﴿٣١﴾

32. Quraankana waan u fududaynay xusuus darteed ee ma jirtaa cid ku wacdoomi.

وَلَقَدْ يَسَّرْنَا ٱلْقُرْءَانَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِن مُّدَّكِرٍ ﴿٣٢﴾

Qisooyinkan iyana saasoo kale yuu Quraanku meela badan ugu sheegay, Murtiduse waa in wanaag la raaco, xumaanta iyo madax adayggana laga leexdo iyo ma ruux banii Aadam ah yaa na hanuunin, xaqa umbaa wax la raaca ah. Al-Qamar (18-32).

---

33. Way beeniyeen Qoomkii (Nabi-Luudh) u digiddii.

كَذَّبَتْ قَوْمُ لُوطٍۭ بِٱلنُّذُرِ ﴿٣٣﴾

34. Waxaana ku dirray korkooda Dabayl Dhagaxyo wadata, waxaanse ka nabadgalinnay (Luudh) ehelkiisii (rumeeyay) goor Aroor ah.

إِنَّآ أَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ حَاصِبًا إِلَّآ ءَالَ لُوطٍ ۖ نَّجَّيْنَٰهُم بِسَحَرٍ ﴿٣٤﴾

35. Nicmad xaggannaga ka timid darteed, saasaana u abaalmarinnaa ciddii mahadisa (Eebe).

نِّعْمَةً مِّنْ عِندِنَا ۚ كَذَٰلِكَ نَجْزِى مَن شَكَرَ ﴿٣٥﴾

36. Nabi-Luudh wuxuu uga digay qoomkiisii qabashadannada (daran), wayse shakiyeen digiddaas.

وَلَقَدْ أَنذَرَهُم بَطْشَتَنَا فَتَمَارَوْا۟ بِٱلنُّذُرِ ﴿٣٦﴾

37. Waxayna dooneen martidiisii (inay xumeeyaan) markaasaan indhaha tirray, waxaana lagu yidhi dhadhamiya caddibaadda Eebe iyo digiddiisa.

وَلَقَدْ رَٰوَدُوهُ عَن ضَيْفِهِۦ فَطَمَسْنَآ أَعْيُنَهُمْ فَذُوقُوا۟ عَذَابِى وَنُذُرِ ﴿٣٧﴾

38. Waxaa ku waabariistay caddibaad sugan.

وَلَقَدْ صَبَّحَهُم بُكْرَةً عَذَابٌ مُّسْتَقِرٌّ ﴿٣٨﴾

39. Waxaana lagu yidhi dhadhamiya caddibaadda Eebe iyo digiddiisa.

فَذُوقُوا۟ عَذَابِى وَنُذُرِ ﴿٣٩﴾

40. Waan fududaynay Quraanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid wacdoomi.

وَلَقَدْ يَسَّرْنَا ٱلْقُرْءَانَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِن مُّدَّكِرٍ ﴿٤٠﴾

41. Fircoon iyo ehelkiisii waxaa uyimid digid.

وَلَقَدْ جَآءَ ءَالَ فِرْعَوْنَ ٱلنُّذُرُ ﴿٤١﴾

42. Wayna beeniyeen Aayaadkannagii dhammaanteed, markaasaan u qabannay si xoog iyo awood leh.

كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا كُلِّهَا فَأَخَذْنَٰهُمْ أَخْذَ عَزِيزٍ مُّقْتَدِرٍ ﴿٤٢﴾

Sidoo kale Qoomkii Nabi-Luudh iyo falkoodii xumaa, iyo Fircoon iyo islawaynankiisii wax badanbay Quraanka ku soo arooreen, mana qarsoona waxay ku dambeeyeen, xumaanlowna saas ha fisho. Al-Qamar (33-42).

---

43. Ma Gaaladiinnan baa ka khayr badan kuwaas mase dambi la‘aanbaa idiin ku sugan Kutubta.

أَكُفَّارُكُمْ خَيْرٌ مِّنْ أُو۟لَٰٓئِكُمْ أَمْ لَكُم بَرَآءَةٌ فِى ٱلزُّبُرِ ﴿٤٣﴾

44. Mase waxay dhihi koox guulaysan yaanahay.

أَمْ يَقُولُونَ نَحْنُ جَمِيعٌ مُّنتَصِرٌ ﴿٤٤﴾

45. Waa la jabin kooxda, Dabadayna jeedin.

سَيُهْزَمُ ٱلْجَمْعُ وَيُوَلُّونَ ٱلدُّبُرَ ﴿٤٥﴾

46. Saacadda (Qiyaame) yaa ballan u ah, Saacadduna iyadaa daran oo khadhaadh.

بَلِ ٱلسَّاعَةُ مَوْعِدُهُمْ وَٱلسَّاعَةُ أَدْهَىٰ وَأَمَرُّ ﴿٤٦﴾

47. Kuwa dambiilayaasha ah baadi iyo fogaansho yay ku suganyihiin.

إِنَّ ٱلْمُجْرِمِينَ فِى ضَلَٰلٍ وَسُعُرٍ ﴿٤٧﴾

48. (Waxaana lagu dhihi) Maalinta Naarta WajiWaji loogu ridi dhadhamiya taabashada Saqara.

يَوْمَ يُسْحَبُونَ فِى ٱلنَّارِ عَلَىٰ وُجُوهِهِمْ ذُوقُوا۟ مَسَّ سَقَرَ ﴿٤٨﴾

49. Wax kasta waxaan ku abuurray qadar.

إِنَّا كُلَّ شَىْءٍ خَلَقْنَٰهُ بِقَدَرٍ ﴿٤٩﴾

50. Amarkannaguna ma aha mid mooyeen sida Ilbidhiqsi.

وَمَآ أَمْرُنَآ إِلَّا وَٰحِدَةٌ كَلَمْحٍۭ بِٱلْبَصَرِ ﴿٥٠﴾

51. Dhab ahaan baan u halaagnay kuwa idin la mid ah, ee wax waantoobi ma jiraa.

وَلَقَدْ أَهْلَكْنَآ أَشْيَاعَكُمْ فَهَلْ مِن مُّدَّكِرٍ ﴿٥١﴾

52. Wax kastoo dadku falo wuxuu ku suganyahay Kutubta.

وَكُلُّ شَيْءٍ فَعَلُوهُ فِي ٱلزُّبُرِ ﴿٥٢﴾

53. Wax kastoo yar ama waynna waa qoranyahay.

وَكُلُّ صَغِيرٍ وَكَبِيرٍ مُّسْتَطَرٌ ﴿٥٣﴾

54. Kuwa dhawrsadana waxay gali Jannooyin iyo wabiyaal.

إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِي جَنَّٰتٍ وَنَهَرٍ ﴿٥٤﴾

55. Meel la fadhiisto oo xaq ah oo Eebaha awoodda leh agtiisa ah (yaa u sugnaatay).

فِي مَقْعَدِ صِدْقٍ عِندَ مَلِيكٍ مُّقْتَدِرٍ ﴿٥٥﴾

Gaaladii reer Makaad iyo xaq diidayaashuba kama wanaagsana Gaaladii hore ee la halaagay, Ruux iyaga ka mid ah oo xumaan la'aan Eebe u ballanqaadayna ma jiro, xoog ku faanna qiimo ma leh, immisaa jabtay cid is bidaysay tiro iyo tayaba, xusuuso Maalintii Badar ee Muslimiinta iyo Gaaladu kulmeen iyo Maalmihii ka dambeeyayba, waxayna ku tusin xaqnimada quraanka iyo siduu Eebe ballankiisii u oofiyay, waxaase Gaalo jab Adduun u sii dheer caddibaadda Qiyaame iyo Naarta Saqara.
Eebeheenna wax walbaba qadarbuu ku ahaysiiyay, wax ku culusna ma jiro, wax walbana Kitaab-buu ku yaallaa, kuwa dhawrsadana wuxuu ku abaalmarin Janno iyo sharaf, iyo meel la fadhiisto meeja u fiican.
Waxaa laga wariyay Cabdullaahi binu Cumar in Rasuulkii Eebe yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee)(Ummad la arko waxay leedahay Majuusi, Majuusiga Ummaddaydu waa kuwa dhihi Qadar ma jiro, Hadday bukoodaan ha booqannina, hadday dhintaanna ha u tagina). waxaa wariyay Imaam Axmad Binu xambal.
Hadalkii Nabiga ee saxiixa ahaana waa: (Eebe kaalmayso hana cajisin, haddii wax kugu dhaco dheh waa qadar Eebe wuxuu doonayna wuu falay, Hadhihin haddaan falilahaa sidaas waxay noqonlahayd sidaas, qoomammo waxay furtaa fal shaydaan). Al-Qamar (43-55).

# Suurat Ar-Raxmaan

# سُورَةُ الرَّحْمَٰنِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa Ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista:

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Eebaha) Raxmaan ah.

ٱلرَّحْمَٰنُ ﴿١﴾

2. Wuxuu baray (Nabiga iyo dadka kalaba) Quraanka.

عَلَّمَ ٱلْقُرْءَانَ ﴿٢﴾

3. Dadkana wuu abuuray.

خَلَقَ ٱلْإِنسَٰنَ ﴿٣﴾

4. Wuxuuna baray dadka (Hadalka).

عَلَّمَهُ ٱلْبَيَانَ ﴿٤﴾